National Institute for Public Health
and the Environment
*Ministry of Health, Welfare and Sport*

# *Ilmahaaga ka badbaadi* 12 cudurada infakshanka

## Mashruuca Tallaalka Ee Dowladda

**Waxaa Nederland waqti hore ay ilmo badan u dhiman jireen cudurada infekshanka kuwaasi hadda tallaalo ayaa loo sameeyey. Maadaama ilmaha ugu badan Nederland laga tallaalo cuduradaan lama arko. Taasoo mahada ay leedahay Mashruuca tallaalka ee Dowladda ayaa ilmaha dhamaan Nederland degan si lacag la'aan ayaa loo tallaalaa.**

### Maxay yihiin cudurada infakshanka?

Cudurada infekshanka waa cuduro leys qaadsiiyo.Waxey sababi karaan iney aad u faafaan haddii aan ilmaha laga tallaalin. Waxaa cudurada infekshanka sababa bakteeriyada iyo fayruska.

*95% dhamaan ilmaha Nederland waa la tallaalay.*

### Maxaa tallaalka uu muhiim u yahay?

Tallaalka ilmahaaga ayaad ku badbaadineysaa. Haddii aan la tallaalin, cudurada infakshanka ayaa dib u soo noqonaaya. Sidaa awgeed waa muhim in ilmo walba uu ka qeyb qaataa Mashruuca tallaalka Dowladda. Mashruuca tallaalka Dowladda waxey sannadkii sameeyaan ilaa 2,5 milyan oo tallaal ah.

### Curadee ayaa ilmaha laga badbaadiyaa?

Waxaa Nederland ilmaha laga badbaadiyaa 12 cuduro daran oo infakshanka ah. Mashruuca tallaalka wuxuu bilowdaa ilmaha markuu jiro inta u dhexeysa 6 iyo 9 wiig.



### Tallaalka ma yahay wax laysku aamini karo?

Tallaalka si buuxda ayaa loo tijaabiyaa inta aan suuqa la geynin. Maadaama tallaalka ilmo caafimaad qaba la siinaayo. Waxaa si xoogan looga baaraa waxa ay ku reebi karaan. Waxaa baaritaano lagu sameeyaa wixii qatar ay u keeni karto ilmahaasi badan (kumanaan ilaa malyano). Waxaa taasi ka muuqday in tallaalka aamin yahay. Wax shaqo ah iskuma laha mashruuca tallaalka dowladda iyo tusaale ahaan dhaawaca maskaxda, dib u dhaca horumarka, suuxdinta, sokorowga, autismka ama ilmaha jiifka ku dhinta.

## 1. Diphteria (Difterie)

Qanjir bararka waa infekshan cunaha ku dhaca. Ilmaha qaba infekshanka, waxey qatar u yihiin iney neefta ku dhegto. stikken. Qanjir babarka Nederland laguma arko. Haddii aan laga tallaalin, cudurka wuu soo noqonaayaa.

## 2. Xiiq dheer (Kinkhoest)

Xiiq dheerta waxey leedahay qufac aad u badan oo bilo socon kara. Tani waxey ilmaha ku ridi kartaa daal daran iyo dhaawac maskaxda. Weyna u dhiman karaan. Qajir bararka si buux loogama hortagi karo laakiin dadka tallaalan dhib weyn uma laha. Maadaama xiiq dheer weliNederland lagu arko, waa muhiim in ilmaha markey dhashaan sida ugu dhaqso badan in loo tallaalo.

## 3. Teetano (Tetanus)

Teetanada waxey sababi kartaa murqaha oo wada adkaada. Haddii aan la daaweyn teetanada waa loo dhintaa. Teetanada leysma qaadsiiyo .ilmuhu wuxuu teetanada ka qaadi karaa haddii uu xeywaan (guriga) qaniino ama nabar uu leeyahay wasaq jidka yaala uga dhaco.

## 4. Dabeyl (Polio)

Dabeysha waa cudur infekshan ah oo daran wuxu sababaa curyaannimo lugaha, gacmaha iyo muruqyada neefsashada.

## 5. Cudurka Hib (Hib-ziekte)

Waxaa bakteeriyada Hib sababaan infekshan daran sida dhiiga oo sumowda, maskaxda-infekshan qaada, cunaha infekshan yeesha, sambabka infekshan yeesha iyo laalaabatada.

## 6. Cagaarshowga B (Hepatitis B)

Cagaarshowga B waa infekshanka beerkak u dhaca. Cagaarshowga B markuu muddo dheer jiro beerka ayaa yaraada iyi kansarka beerka ayuu keenaa. Tallaalka nolosha dhan ayuu ku badbaadina.

## 7. Cudurka Pneumococcal (Pneumokokkenziekte)

Cudurka Pneumococcen waa bakteeriyada sababta dhiiga oo sumowda,, infeksahan daran oo sambabka iyo xuubka maskaxda oo infekshan qaada. Xitaa ilmaha dhagoo wuu noqon karaa. Tallaalka wuxuu ka hortagaa noocyada jira pneumokcoccen badankooda.

## 8. Qaamo qashiir (Bof)

Qaamo qashiir waa infakshan dhecaanka qanjirka. Sidaa darteed ayaa ilmaha leh qaamo qashiir ay leeyihiin daanka oo barara iyo qoorta. Mar mar waxaa jira xuubka maskaxda oo barara.

## 9. Jadeeco (Mazelen)

Jadeecada waa cudur nabro oo ay xumad iyo en jirka oo wax ka soo baxa. Badiyaa waxaa jira dhago- xanuun iyo sambab xanuun iyo mar mar xuubka maskaxda oo infekshan yeesha.. Jadeecada aad ayaa leysu qaadsiiyaa. Mar mar ilmo ayaa jadeeco u dhinta.

## 10. Hablo baas ama Rubella (Rodehond)

Hablo baas waa cudur nabro. Waxba kama dareemeysid, laakiin cudurka waa mid leys qaadsiiyo. Mudada uurka ayuu hablo baas ugu qatarsan yahay ilmaha caloosha ku jira. Ilmaha wuxuu dhalan karaa asagoo leh cuduro aad u daran.

## 11. Cudurka Meningococcen C (Meningokokkenziekte C)

Ilmaha leh cudurka meningococcenziekte C waxey yeelanayaan xuubka maskaxda oo infekshan qaada ama dhiiga oo sumowda. Markay bogsadaan, waxey noqon karaan kuwa dhagoolnimo leh, dhibaato ka qaba xagga waxbarashada ama dhaqanka iyo dhiiga sumowday awgeed in gacan ama lug laga gooyo.

## 12. Cudurka HPV (HPV)

Humaan papillomavirus (HPV)waa fayrus leys qaadsiiyo kaasoo dhalin kara kansarka afka ilmo galeenka. Tallaalka wuxuu ka hortagaa 2 nooc HPV kuwaasoo ilaa 70% sababa kansarka afka ilmo galeenka.

### Talooyin markuu ilmahaaga xanuunsado

- Adigoo haboow siiya ama mashquuliya xanuunka waa ka yaraadaa.
- Xumad? Ilmaha cabitaanka u badi.
- Xanuun meesha laga muday ah? Gacanta ama lugta la muday inaan la taabanin.Marka la sii taabto xanuunka ayaa kordha.
- Ilmahaaga ma oynayaa ama xanuun badan yaa haaya maalinta la tallaalay? Markaa waxaad siin kartaa paracetamol. Ka fiiri warqadda la socota qiyaasta ilmahaaga aad siineyso.
- Waalidka waxey mar mar rabaan iney ilmaha ruxaan. Taasi weligaa ha sameynin. Waxey sababi karaan maskaxda oo dhaawac gaara.

Maka welweleysaa ilmaha inuu xumadaa iyo daalka 2 beri ka badan aya hayaan?, markaa dhaqtarka la tasho. Xanuunka ilmaha cudur kale inuu yahay ayaa dhicii kara.

# Jadwalka tallaalka:

| Qeybta 1 | Tallaalka 1 | Tallaalka 2 |
|---|---|---|
| **6-9 wiig** | DKTP<br>Hib<br>HepB | Pneu |
| **3 bilood** | DKTP<br>Hib<br>HepB | |
| **4 bilood** | DKTP<br>Hib<br>HepB | Pneu |
| **10-11 bilood** | DKTP<br>Hib<br>HepB | Pneu |
| **14 bilood** | BMR | MenC |

| Qeybta 2 | Tallaalka 1 | Tallaalka 2 |
|---|---|---|
| **4 sano** | DKTP | |

| Qeybta 3 | Tallaalka 1 | Tallaalka 2 |
|---|---|---|
| **9 sano** | DTP | BMR |

| Qeybta 4 | Tallaalka 1 | Tallaalka 2 |
|---|---|---|
| **12 sano** | HPV* | HPV*<br>(6 bilood ka dib) |

**Micnaha ereyada la soo gaabiyey**

| | |
|---|---|
| D | Diphteria |
| K | Xiiq dheer |
| T | Teetano |
| P | Dabeyl |
| Hib | Cudurka hib nooca b |
| HepB | Cagaarshow B |
| Pneu | Cudurka Pneumococcal |
| B | Qaamow qashiir |
| M | Jadeeco |
| R | Hablo baas Rubella |
| MenC | Meningococcen C |
| HPV* | Cudurka HPV |

* Gabdhaha keliya

## Ilmahaaga ma tallaaleysaa?

Tallaalka badbaado muhiim ah ayuu siinayaa. Adiga ayaa go'aansanaaya inaadilmahaaga tallaaleyso. Ka fiiri websaytka ingiriiska ku qoranwww.rivm.nl/nip wixii warbixin dheeraad ee cudurada iyo tallaalka . Waxaad su'aalaha weydiin kartaa dhaqtarka iyo kalkaalisada xarunta tallaalka (consultatiebureau).

## Goormaa ilmahaaga la tallaalayaa?

Ilmaha waxaa la tallaalayaa laga bilaabo 6 wiig ayagoo jira. Waxaa badbaado fiican u ah in ilmahaaga uu dhamaan jadwalka tallaalka dhamaan qaato.

## Ilmaheyga ma badbaadsan yahay hadduu weli (dhamaan) aan la wada tallaalin?

Maya, waa muhiim in dhamaan la wada qaato. Markaa ka dib ayuu badbaado buuxda imaanayaa. Maadaama dhamaan badankoodacilmaha ay ka qeyb qaataan mashruuca tallaalka dowladda, xanuunada Nederland badiyaa laguma arko.

## Ilmaheyga mala tallaali karaa hadduu jiran yahay oo daawo isticmaalo?

Kala tasho tallaalka ka hor dhaqtarka ama kalkaalisada tallaalaysa..Mar mar waxaa fiican in tallaalka dib loo dhigo.

## Ilmahaaga ma xanuunsanayaa tallaalka ka dib?

Taasi wey dhici kartaa, laakiin qasab ma aha. Ilmaha siyaalo kala duwan ayey tallaalka u dareemaan. Badiyaa maalinta la tallaalay ayey xanuunsadaan. Badiyaa 2 beri gudahooda wey fiicnaadaan. Tallaalka qaamow qashiir, jadeecada iyo hablo baas (BMR) waxey xanuunsadaan 5 ilaa 12 beri tallaalka ka dib.

> Ilmaha ha siinin xanuun jebiye ama paracetamol tallaalka ka hor. Tallaalka ayaa si fiican u shaqeyn karin.

## Sidee u xanuunsadaan ilmaha tallaalka ka dib?

- Xanuun markey dhaqaajiyaan gacanta ama lugta laga muday.
- Meesha gaduuta , barara ma xanuun meesha la tallaalay.
- Ilmaha oo daalaaya ama ooynaaya.
- Xumad ama qandho.
- Ilmaha yar yar oo hurdada ku xasilin ama wax badan hurda.
- Ilmaha ilaa 4 jir oo suuxa wel wel darteed.

## Ilmahaaga wax xanuun ah ma kala kulmay?

La socodsii dhaqtrakii ama kalkaalsadii tallaashay. Dhamaan xanuunada wxaa lagu baaraa xarunta (Bijwerkingencentrum) Lareb. Adigana waad u gudbin kartaa oo kala xariir www.lareb.nl.

## Qoraalka la socda

Tallaal walba waxaa la socda warbixin tallaalka la socda. Qoraalka dambe ee la socda wuxuu ku yaalaa www.rijksvaccinatieprogramma.nl/bijsluiters.

## Warbixinta tallaalka

Xarunta dowladda ee caafimaadka iyo bii'ada (RIVM) ayaa mar hore ku soo wargelinaaya tallaalka. Warbixinta tallaalka waxaa keydinaaya RIVM sida uu qabo Sharciga Xafidaada warbixinta qofka iyo eaxa keliya loo adeegsanayaa Mashruuca tallaal dowladda.

## Warbixin dheeraad?

Ka fiiri www.rivm.nl/nip ama weydii su'aasha dhaqtarka ama kalkaalisada xafiiska tallaalka.

Qoraalkan waxaa soo saaray:

**National Institute for Public Health and the Environment**
PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven
www.rivm.nl

July 2015

Daryeelka beri *maanta ayuu bilowdaa*

008441